

LAANTA SHARCIGA EE MAINE

Dacwoodaha

MAXKAMADDA DEGMADA

Goobta (Magaalada): _____

Lambarka Dacwadda.: _____

☐ shaqsi ahaan ah **iy**o ka wakiil ah:

☐ ka wakiil ah:

V.

Eedeysanaha

☐ ka wakiil ah:

AMARKA KA-HORTAGGA DHIBAATAYNTA

☐ WAX LAGA BEDDALAY: ☐ IS-AF-GARAD LAGA GAARAY ☐ DHAGEYSIGA KADIB

5 M.R.S. § 4655

FADLAN OGOW: Koodhka 3-lambar ee ku yaala bidix ee xaaladaha hoos ku xusan waxaa loogu talagalay isticmaal gudaha ah oo keliya, waana la iska indhatiri karaa.

Codsiga Dacwoodaha ee ilaalinta waa:

☐ loo oggolaaday.

☐ loo diiday qayb ahaan. Kuwa soo socda ayaa lagu ilaalinayaa sida ku xusan Qodobkan (*qor/dooro qolo kasta oo la ilaalinayo*):

Kadib ogeysiis habboon iyo ☐ fursad dhageysi buuxa ☐ dhageysi buuxa oo ku saabsan dacwadda ka-hortagga dhibaataynta, iyadoo dhinacyada soo socda ay joogeen: ☐ dacwoodaha ☐ eedeysanaha.

MAXKAMADDU WAXAY OGAATAY SIDA SOO SOCOTA: (*kaliya sanduuqyada la calaamadeeyay ayaa khuseeya*)

[322] ☐ (1) Eedeysanaha/eedeysanayaashu waxay dhibaateeyeen dacwoodaha;

[323] ☐ (2) Dhinacyadu waxay ku heshiiyeen Amarka soo socda, kaas oo la sameeyay iyada oo aan la helin go'aan rasmi ah oo sheegaya dhibaatayn.

SIDAAS DARTEED, Waxaa HALKAN LAGU AMRAY SIDA SOO SOCOTA: (*kaliya sanduuqyada la calaamadeeyay ayaa khuseeya*)
Haddii dacwooduhu yahay ganacsi oo leh shaqaale, erayga "dacwoodaha" hoos ku qoran waxaa ku jira shaqaalahaas.

[324] ☐ (A) Eedeysanaha waxaa laga mamnuucay inuu dhibaateeyo, u hanjabo, weeraro, faraxumeeyo, ama si kale ugu xadgudbo dacwoodaha iyo, haddii ay khuseyso, shaqaalaha dacwoodaha.

[325] ☐ (B) Eedeysanaha waxaa laga mamnuucay inuu galo ama tago guriga ama hantida dacwoodaha.

[326] ☐ (C) Eedeysanaha waxaa laga xannibay inuu farageliyo ama burburiyo hantida dacwoodaha.

[327] ☐ (D) Eedeysanaha waxaa laga mamnuucay inuu si joogto ah oo aan sabab macquul ah lahayn u daba-galo, una raaco dacwoodaha.

Ogeysiiska ADA: Laanta Garsoorka ee Maine waxay u hoggaansantaa Xeerka Maraykanka ee Naafonimada (Americans with Disabilities Act, ADA). Haddii aad u baahan tahay fududeyn macquul ah, la xiriiir Isuduwaha Helitaanka Maxkamadda oo ah, accessibility@courts.maine.gov, ama karraaniga maxkamadda.

Adeegyada Luqada: Wixii ah caawimaada luqadda iyo turjubaannada, la xiriiir karraaniga maxkamadda ama interpreters@courts.maine.gov.

LAANTA SHARCIGA EE MAINE

[328] ☐ (E) Eedeysanaha waxaa laga mamnuucay inuu si joogto ah oo aan sabab macquul ah lahayn ugu sugo ama ugu dhowaado guriga, iskuulka, ganacsiga, ama goobta shaqada ee dacwoodaha, marka laga reebo sida soo socota:

[329] ☐ (F) Eedeysanaha waxaa laga mamnuucay inuu wax xiriir ah, si toos ah ama si dadban, la yeesho dacwoodaha, marka laga reebo sida soo socota:

[330] ☐ (G) Marka la eego sawirrada gaarka ah sida lagu qeexay 17-A M.R.S. § 511-A, eedeysanaha waa inuu bixiyo kharashaadka la xiriira ka saarista, burburinta, ama soo celinta sawirrada gaarka ah iyo/ama sameeyo sida soo socota:

[331] ☐ (H) Eedeysanaha waxaa laga mamnuucay inuu burburiyo, wareejiyo, ama faragelin ku sameeyo baasaboorka dacwoodaha ama dukumiintiyada kale ee socdaalka ee uu eedeysanuhu haysto.

[333] ☐ Eeg warqadaha dheeraadka ah ee ku lifaaqan, kuwaas oo qayb ka ah Amarkan.

DIGNIIN: Ku xad-gudubka Amarka ku qoran faqradda (A) ilaa (H) waa dembi Heeraka D ah, waxaana sidoo kale laga yaabaa inuu noqdo ku-xadgudub maxkamadeed.

Waxaa SIDOO KALE LA AMRAY SIDA SOO SOCOTA: (kaliya sanduuqyada la calaamadeeyay ayaa khuseeya)

☐ (I) Eedeysanaha waa inuu ka saaro, burburiyo, ama soo celiyo sawirrada gaarka ah, ama uu faro in la tirtiro, la burburiyo, ama la soo celiyo, waa inuu joojiyo faafinta sawirrada gaarka ah, waxaana laga mamnuucay faafin kasta oo mustaqbal ah ee sawirradaas.

☐ (J) Waxaa SIDOO KALE LA AMRAY:

☐ Eeg warqadaha dheeraadka ah ee ku lifaaqan, kuwaas oo loogu soo daray sida tixraac ahaan.

DIGNIIN: Ku xad-gudubka faqradda (I) iyo (J) waa ku-xadgudub maxkamadeed .

AMARRADA XUKUNKA LACAGTA: (kaliya sanduuqyada la calaamadeeyay ayaa khuseeya)

☐ Eedeysanaha waxaa lagu amray inuu siiyo dacwoodaha lacag dhan \$_____ isla markiiba, taasoo ah magdhow lacageed oo ka dhalatay khasaaraha si tooska ah uga dhashay dhibaataaynta, waxaana ku waajib ah fulin.

☐ ☐ Eedeysanaha ☐ Dacwoodaha waxaa lagu amray inuu bixiyo _____ isu-darka \$_____ kharashka qareenka \$_____ kharashka maxkamadda. Lacag bixinta waa in lagu sameeyaa gudaha _____ maalmood, waxaana ku waajib ah fulin.

☐ Eedeysanaha waxaa lagu amray inuu bixiyo _____ isu-darka \$_____ kharashaadka la xiriira ka saarista, burburinta, ama soo celinta sawirada gaarka ah.

Ogeysiiska ADA: Laanta Garsoorka ee Maine waxay u hoggaansantaa Xeerka Maraykanka ee Naafonimada (Americans with Disabilities Act, ADA). Haddii aad u baahan tahay fududeyn macquul ah, la xiriir Isuduwaha Helitaanka Maxkamadda oo ah, accessibility@courts.maine.gov, ama karraaniga maxkamadda.

Adeegyada Luqada: Wixii ah caawimaada luqadda iyo turjubaannada, la xiriir karraaniga maxkamadda ama interpreters@courts.maine.gov.

LAANTA SHARCIGA EE MAINE

DIGNIIN: Ku guuldareysiga bixinta amarrada xukunka lacagta waxay noqon kartaa ku-xadgudub maxkamadeed, waana la fulin karaa sida xukun kasta oo madani.

Inta Amarkani shaqeynayo, waa inaad si buuxda u raacdaa. Qofna, oo ay ku jirto dacwoodaha, ma siin karo oggolaansho aad ku jebiso Amarkan.

Amarradani waxay dhaqan galayaan isla markiiba waxayna si buuxda u shaqeyn doonaan ilaa (mm/dd/yyyy) _____, haddii aan horey loo beddelin ama loo burin amar maxkamadeed.

Nuqullada Amarkan waxaa karraanigu siin doonaa hay'adda sharci fulinta ee leh awoodda goobta uu deggan yahay dacwooduhu. Waxaa la **AMRAY** in nuqul ka mid ah Amarkan gacanta loogu dhiibo ee deysanaha iyadoo loo marinayo (hay'adda sharci fulinta) _____, ama hay'ad kale oo sharci fulin oo la oggol yahay.

Amarkan waxaa lagu daray faylka maxkamadda iyadoo la raacayo M.R Civ. P. 79(a).

Tariikhda (mm/dd/yyyy): _____



Garsoore, Maxkamadda Degmada

Nuqul sax ah, waan xaqiijinayaa: _____
Karraani

SOO CELINTA ADEEGA

Markay ahayd tariikhda (mm/dd/yyyy) _____, saacadda _____ ☐ AM ☐ PM, waxaan gaarsiiyay Amarka Ka-hortagga Dhibaataaynta anigoo nuqulka gacanta ku siiyay ee deysanaha meel ku taala _____.

Tariikhda dhalashada ee deysanaha (mm/dd/yyyy): _____

Tariikhda (mm/dd/yyyy): _____



Saxiixa Sarkaalka Idman

Hay'adda Sharci Fulinta

Magaca la daabacay ee Sarkaalka Idman

Ogeysiiska ADA: Laanta Garsoorka ee Maine waxay u hoggaansantaa Xeerka Maraykanka ee Naafonimada (Americans with Disabilities Act, ADA). Haddii aad u baahan tahay fududeyn macquul ah, la xiriiir Isuduwaha Helitaanka Maxkamadda oo ah, accessibility@courts.maine.gov, ama karraaniga maxkamadda.

Adeegyada Luqada: Wixii ah caawimaada luqadda iyo turjubaannada, la xiriir karraaniga maxkamadda ama interpreters@courts.maine.gov.